# Wasaaradda Waxbarashada ee Maraykanka
# Xafiiska Xuquuqda Madaniga:

# Sugidda Helitaan Loo Siman Yahay Xagga Waxbarasho Tayo Sare Leh

U.S. Department of Education
Office for Civil Rights
Washington, DC 20202-1100

**La naqtiimay Bishii Sagaalaad 2004**

**Saameynta Xeerarka Xuquuqda Madaniga ah**

Fulinta xuquuqda madaniga ah ee federalka waxay gargaar ka geysatay isbeddelo qoto dheer oo lagu sameeyay waxbarashada Maraykanka waxana ay fursadaha waxbarasho u hagaajisay malaayiin arday ah. Waxa la burburiyay caqabado badan oo berigii hore qofka ka horjoogsan jiray in uu si xor ah u doorto fursadaha waxbarasho iyo xirfadda uu jecel yahay inuu sii wato. Hab dugsiyeedyo badan ayaa imminka suurogal uga dhigaya ardayda aan ku fiicnayn Ingiriisiga inay si waxtar leh uga qaybgalaan barnaamijyadooda waxbarasho. Arday badan oo leh naafo ayaa imminka awoodi kara, marka la siiyo qalab ah iyo adeegyo kaaba, inay ka qaybgalaan fasalo waxbarasho oo caadi ah.

Waxa kale oo jirta in Xeerka Yaan Cunugna Laga Tagin ee 2001 (No Child Left Behind Act of 2001) (NCLB) oo si buuxda wax uga beddelayo barnaamijyada waxbarasho ee uu hormarinayo hadafka Wasaaradda oo ah sugidda helitaan loo siman yahay xagga waxbarashada iyo hormarinta wacnaanta waxbarasho dhamaan wadanka oo dhan. Xeerka NCLB waxa ku jira qodobo khaasa loogu talogalay in lagu sugo in dhamaan caruurtu helaan waxbarasho tayo sare leh si kasta ha ahaado sinjidoogu, qowmiyadoodu, caynkooda lab ama dhedig, naafadooda ama xaaladdooda bulsho-dhaqaale.

Xeerarka xuquuqda madanigu waxay albaabada u fureen dugsiyadeena, fasaladeena, hoolalkeena, goobaheena ciyaaraha iyo goobaheena dadku isugu yimaado. Iyagoo taa ka jawaabaya, waxa dhacday in dad ka socda dhaqamada kala duwan oo mettela Maraykanka maanta ay albaabadaa ka soo galeen, iyagoo ku sii socda inay noqdaan hoggaamiyayaasheenii i mustaqbalka xagga ganacsiga, dawladda, sayniska, farshaxanka iyo waxbarashada. Xeerarka xuquuqda madaniga, oo lagu labeeyay Xeerka NCLB, ayaa sugi doonaa in albaabadaasi ahaadaan kuwo u furan dhamaan dadka.

**Mas'uuliyadahaa Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah**
Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah (Office for Civil Rights) (OCR), oo ka tirsan Wasaaradda Waxbarashada ee Maraykanka (U.S. Department of Education), waa hay'ad fulin sharci oo

masuuliyadeedu tahay fulinta sharciga federalka si loo sugo in goobaha waxbarasho ee qaata gargaar dhaqaale oo federalka bixiyo aanay ku kicin dhaqan takooris ah. OCR waxa uu fuliyaa xeerarka xuquuqda madanigaha oo ka mamnuucaya takoorista ku saleysan sinji, midab, asal wadan, lab iyo dhedig, naafo iyo da' barnaamijyada ama hawlaha Wasaaradda ka hela gargaar dhaqaale oo federalku bixiyo. Xeerarka xuquuqda madanigu waxay u taagan yihin ballanqaad qaran oo lagu dhameynayo takoorista xagga barnaamijyada ama hawlaha waxbarashashada. Xeerarkaasi waxay yihiin:

- Madaxa VI ee Xeerka Xuquuqda Madaniga ee 1964 (Civil Rights Act of 1964) (oo mamnuucaya takoorista sinjiga, midabka iyo asalka wadanka);

- Madaxa IX ee Wax-ka-beddelidda Waxbarashada ee 1972 (Education Amendments of 1972) (oo mamnuucaya takoorista labka iyo dhediga ku saleysan);

- Qaybta 504 ee Xeerka Dib-u-kabsashada ee 1973 (Rehabilitation Act of 1973) (oo mamnuucaya takoorista naafada);

- Xeerka Takoor Da'da 1975 (Age Discrimination Act of 1975) (oo mamnuucaya takoorista da'da); iyo

- Madaxa II Xeerka Mareykanka leh karti-darroda ee 1990 (Americans with Disabilities Act of 1990) (oo ka mamnuucaya takoorista naafada hay'adaha dadweynaha, oo ay ku jiraan dugsiyada dadweynaha, koleejyada dadweynaha iyo jaamacadaha, dugsiyada farsamada ee dadweynaha iyo laybareeriyada dadweynaha, ha qaataan ama yaanay qaadan gargaarka dhaqaale ee federalka).

Waxa kale oo OCR uu fuliya Xeerka U-sinnaanta Gelidda Wiilasha Sahanka ee Ameerika (The Boy Scouts of America Equal Access Act),' oo ka tirsan Xeerka Yaan Cunugna Laga Tagin ee 2001. Marka la eego xeerka 'Xeerka U-sinnaanta Gelidda Wiilasha Sahanka ee Ameerika' waa inaan dugsi hoose oo dadweyne,

dugsi sare oo dadweyne ama hay'ad gobol ama degmo oo bixisa fursada ay hal koox ama in ka badan oo ah dhallinyaro ama kooxo beeleed oo dibadda ka yimi si ay ugu kulmaan aagga dugsiga ama goobaha dugsiga ka hor ama ka dib saacadaha dugsiga u diidin wax helistiisa loo siman ama fursad lagu kulmo, ama aan la takoorin koox si rasmi ah xidhiidh ula leh Wiilasha Sahanka ee Ameerika, ama koox dhallinyaro oo kale oo xeerka Madaxa 36 ee Xeerka Maraykanka ugu xusan urur wadani.

Hawlaha OCR intooda badani waxay ka dhacaan xafiisyada fulinta ee ku baahsan wadanka. Gudaha Washington, D.C., 'Xafiiska Kaaliyaha Xoghayaha Xuquuqda Madaniga' ayaa bixiya horseednimo iyo isu-duwid guud.

**Xeerarka khuseeya Goobaha Waxbarashada**

Xeerarka xuquuqda madanigu waxa lagu dabaqaa goobaha waxbarashada ee wadanka intooda badan, sababta ah oo goobaha waxbarashada intooda badani waxay helaan nooc ah gargaar uu federalku bixiyo. Taa macnaheedu waxa weeye in xeerarka xuquuqda madanigu ay saameynayaan ama lagu dabiqi karo:

- inta badan 15,000 oo ah dugsi-degmeedyo;
- tiro ka badan 4,100 oo ah koleejyo iyo jaamacado;
- qiyaastii 5,000 goobood oo bixiya shahaadooyin ka hooseeya heerka 'associate degree,' sida dugsiyada tababarka wadeyaasha baabuurta xamuulka iyo dugsiyada isqorxinta; iyo
- kumanaan hay'adood oo kale, sida laybareeriyada, madxafyada, hay'adaha dhaqan-celinta farsamada iyo goobaha asluubta.

**Xeerarka Khuseeya Ardayda iyo Shaqaalaha**

Xeerarka xuquuqda madanigu waxay badbaadiyaan tiro badan oo ah arday dhigata, ama codsanaya inay dhigtaan, goobaheena waxbarashada, oo sidatan ah:

- qiyaastii 54.3 malyan oo ah ardayda dhigata dugsiyada hoose iyo sare; iyo
- qiyaastii 16.4 malyan oo ah ardayda dhigata koleejyada iyo jaamacadaha.

Xaaladaha qaarkood, xeerarku waxa kale oo ay badbaadiyaan dadka ka shaqeeya, ama ka raadinaya shaqo goobaha waxbarashada.

**OCR Waxay Qaabishaa Dacwooyinka Takoorista ku Saabsan ee ka Yimaada Dadweynaha**

Hal hab oo muhiim oo OCR uu ku guto mas'uuliyadahiisa waa xalinta dacwooyinka ay keenaan ardayda, waalidka iyo dadka kale. Qasab ma ah in qofka ama hay'adda xereynaysa dacwadda uu yahay dhibanaha uu soo gaadhay takoorista la sheegayo, laakiin waxay dacwadwoon karayaan iyaga oo wakiil ka ah qof ama koox kale. Guud ahaan, OCR waxa uu talaabo ka qaadi doonaa dacwooyinka lagu soo xereeyay gudaha 180 cisho marka la eego falkii ugu dambeeyay ee takoorista la sheegayo, ama marka dacwadda ay sheegayso siyaasad ama dhaqan takooris oo joogto ah.

Waxa OCR soo gaadha qiyaastii 5,000 dacwadood sannad kasta. Dacwooyinku waxay ku saabsan yihiin qaar ka mid ah arrimaha ugu muhiimsan ee saameynaya helitaan loo siman yahay xagga waxbarasho tayo sare leh.

Marka la eego xeerka 'Madaxa VI' — dacwooyinka ku saabsan takooris sinji, midab, ama asal wadan waxa ku jira arrimaha ay ka mid yihiin:

- isticmaalka kala-qaadis ku saleysan sinji ama qowmiyad, oo ay ku jirto kooxeynta awoodda;

- helitaanka adeegyada luqadda-beddelkeed ah oo ay doonanayaan barteyaasha afka Ingiriisiga;
- dhaqamo ah ciqaabid;
- siyaasadda hawlo-u-qaybinta ardayda oo ay ku jirto barnaamijyada loogu talogalay hawl-u-qaybinta ardayda xariifka ah iyo kuwa hibo xariifnimo leh;
- wareejinta ardayda degmooyinka dhexdooda;
- takooris-tirtista dugsiyada;
- dhibista sinjiga ku saleysan;
- guriyeynta ardayda ee ku yaalla kaambasyada koleejyada; iyo
- dhibco-siinta waxbarashada.

Marka la eego xeerka 'Madaxa IX' — dacwooyinka ku saabsan takoorista lab iyo dhedig ku saleysan waxa ku jira arrimaha ay ka mid yihiin:

- dhibista ku saleysan hawlaha la xiriira galmada;
- fursadaha loo siman yahay xagga ciyaaraha ka dhex dhaca dugsiyada iyo kuwa ka dhex dhaca koleejyada;
- la-dhaqmidda ardayda uurka leh; iyo
- galitaanka goobaha waxbarasho ee ka dambeeya dugsiga sare.

Marka la eego xeerka 'Qaybta 504' iyo 'Madaxa II', dacwadaha ku saabsan takoorista naafada waxa ku jira arrimaha ay ka mid yihiin:

- gelitaanka goobaha iyo barnaamijyada dugsiyada;

- adeegydo waxbarasho gaar ah oo haboon;

- qiimeynta iyo meeleynta ardayda laga yaabo inay u baahan yihiin adeegyo waxbarasho oo gaar ah;

- ardayda oo wax lagu baro deegaanka kan ugu xakameynta yar ee ku haboon baahidooda waxbarasho;

- hakinta iyo eryidda ardayda leh naafada;

- cabbirista iyo wax-ka-beddelida waxbarashada; iyo

- qalab kaabid ah oo loogu talogalay ardayda leh dhibaato dareeme, ama dhibaato ah farsamooyinka gacmaha ama hadalka.

**Sida OCR u Xaliyo Dacwooyinka**

Hadafka ugu horeeya ee OCR marka dacwad la xalinayo waxa weeye in la xaliyo sheegashada dacwo-keeneyaasha ee ku saabsan takoorista isla markiiba iyadoo taa loo sameynayo si caadalad leh oo haboon. OCR waxa uu ogaaday in habka ugu fiican ee lagu xalin karo dhibaatooyinka uu yahay hab iskaashi ah oo ka dhexeeya ardayda, waalidka, kooxaha beelaha, hay'adaha waxbarashada heer degmo iyo heer gobol, dugsiyada iyo koleejyada.

OCR waxa uu isticmaalaa dhawr hab oo kala duwan oo lagu xaliyo dacwadaha, oo isugu jira xalin dacwad oo goor hore ah ilaa baadhitaanka iyo ka-wada-hadlidda heshiisyo lala galo deeq-dawladdeed qaateyaasha si ay ikhtiyaarkooda xeerka ugu hoggaansamaan.

Waa marka OCR uu go'aamiyo inaan adeecid lagu heli karin hab ikhtiyaar ah ka dib oo kaliya ayaa OCR uu raadiyaa adeecid loo maro hab dhageysi ama uu Kiisaska u gudbiya Wasaaradda Cadaaladda ee Maraykanka. Habkan dabacsani waxa uu OCR u oggalaanaya in:

- in la bixiyo wax-ka-qabad dhakhso ah oo waxtar leh inta lagu jiro bilawga habka dacwadda;

- in xoogga la saaro adeecidda xeerarka takooris-reebista; iyo

- in ardayda, waalidka iyo madaxda dugsiyada laf-dhabar looga dhigo xalinta dacwadaha.

**OCR Waxa Uu Sameeya Dib-u-fiirin Adeecid**

Kiisas ay hay'addu bilawday, oo caadi ahaan loo yaqaano "dib-u-fiirin adeecid," ayaa OCR u saamaxaya in xoogga la isugu geeyo dhibaatooyinka aad moodid inay daran yihiin, leh baaxad qaran, ama imminka uun soo baxaya.

Dib-u-fiirinta adeecidda jihaysani waxay sare u qaadaa saameynta hawlaha OCR waxana ay dheellitirtaa barnaamijka fulinta. Dib-u-fiirinta adeeciddu waxay sugtaa in kooxaha jilicsan, sida dadka aad u saboolka ah ama aan ku hadlin Ingiriisiga, ee laga yaabo inaanay ka warqabin sharciga, loo badbadiyo xuquuqdooda madani. Waayo-aragnimada soo martay OCR waxay tilmaamaysaa in dib-u-fiirinta adeecidda ee si taxadir leh u jihaysani ay inta badan keento natiijo ah in qaateyaasha gargaarka dawladdu ay soo saaraan isbeddelo siyaasad ama barnaamij oo u faa'iideyo tiro badan oo ah arday — taasoo ka duwan dacwadaha oo iyaga natiijada ka soo baxda laga yaabo inay u faa'iideyso kaliya cidda dacwootay.

OCR marka uu dooranayo in lagu dhaqaaqo dib-u-fiirinta adeecidda waxa uu taa ku saleeyaa, qayb ahaan, warar ka yimi illo kala duwan, oo ay ku jiraan xogta wareysiyada iyo warka ay bixiyaan dacwoodeyaasha, kooxaha waxbarashada, war baahinta iyo dadweynaha. OCR waxa uu dib-u-fiirin adeecid ku sameeyay arrimaha ay ka mid yihiin:

- ardayda dadka laga badan yahay ee ku jira waxbarashada gaarka ah iyo koorasyada socodka gaaban;

- barteyaasha afka Ingiriisiga oo hela adeegyo luqad-beddelkeed ah si ay ugu faa'iideystaan barnaamijyada waxbarasho ee dugsiyada degmooyinka;

- waxbarasho dadweyne oo bilaash ah oo haboon oo ay helaan ardayda leh naafo;

- ardayda dadka laga badan yahay oo hela koorasyada loogu talogalay ardayda xariifka ah iyo koorasyada kale ee horumarsan;

- dhibista ku saleysan sinji;

- deegaannada leh iska-hor-imaad la xiriirta galmada; iyo

- takooris-tirtirista xagga waxbarashada sare iyo dugsiyada hoose iyo sare.

OCR waxa uu og yahay in hay'adaha waxbarashada ee federalka, gobolka, degmada iyo waliba waalidka iyo kooxaha kale ee daneynaya waxbarashada, ay wadaagaan hadaf ah helitaanka fursad loo siman yahay iyo helitaanka faa'iidooyinka waxbashada. OCR waxa uu khibradiisa ku darsadaa khibradaha ay leeyihiin shuraakadaasi iyo daneeyaashaasi la sheegay si loo soo saaro xal waxtar leh, oo ay ku jirto wax-ka-qabad waxbarasho oo dhamaan ardayda u kordhinaya fursadaha waxbarasho.

## Gargaarka Farsamo ee OCR Waxa Uu Caawiyaa Dadka iyo Hay'adaha

Ulajeedada dadaalka gargaarka farsamo ee OCR waxa weeye in laga hortago jebinta xeerarka xuquuqda madaniga. Waxa taa la gaadhaa iyada oo kuwa hela deeqda dawladda laga caawiyo adeecidda sharciga sidoo kalena ka-faa'iideysteyaasha laga caawiyo fahmidda xuquuqdooda. Markii la eegay malaayiinka arday ee xuquuqdooda ay badbaadiyaan xeerarka xuquuqda madaniga ah, waxa OCR uu gartay in dadaalkiisa kaliya aanu ku filnayn joojinta takoorista sharci-darada ah ee ka jirta waxbarashada. Waa in ardayda, waalidka iyo bareyaashu ay

leeyihiin aqoonta iyo farsamada lagaga hortagi karo takoorista sharci-darada ah si aanay marka horeba u dhicin.

Waxa uu OCR bixiyaa gargaar loogu talogalay in hay'adaha uu awood u siiyo inay adeecaan sharciga inta lagu jiro habka xalinta dacwadda ama inta lagu jiro dib-u-fiirinta adeecidda. Waxa kale oo OCR uu qabtaa barnaamij weyn oo ah gargaar farsamo oo ah wax-ka-qabad iyada oo la isticmaalayo habab leh noocyo kala duwan, oo ay ku jiraan wada-tashi goobaha ah, fasalo tababar ah, tababaro, kulano iyo ka-qaybgal shirar. Waxa kale oo uu OCR ka jawaabaa su'aalaha iyo codsiyada gargaar ee ka imanaya hay'adaha federalka, gobolka iyo hay'adaha waxbashada ee degmada, kooxaha beelaha, waalidka, ardayda iyo dadweynaha.

Xafiisyo OCR oo badan ayaa sameeyay kooxo adeeg macmiil oo noqda kuwa dhaqso ugu jawaaba shuraakadayada, daneeyeyaashayada iyo xubnaha ka tirsan dadweynaha. Waxa uu OCR sameeyay rug internetka ah, http://www.ed.gov/ocr, oo la xidhiidhsan rugta internetka ee Wasaaradda Waxbarashada.

**Caqabadaha Inaga Sii Horeeya**

Inkasta oo aan ictiraafsan nahay horumarka ay keentay fulinta xeerarka xuquuqda madaniga ah, waxa jira dad ka tirsan ummada oo si sharci-daro ah loogu diido inay helaan fursado waxbarasho oo buuxa. Waxa wali jira siyaasado iyo dhaqamo u diida koorasyada iyo barnaamijyada heer sare ah dadka leh naafo, dumarka, waayeelka Maraykanka iyo dadka sinji ahaan ama af ahaan laga badan yahay. Ballanqaad ah hadafka barnaamijka adeecidda xuquuqda madaniga ah — oo ah helitaan loo siman yahay, waxbarasho tayo leh, iyo heerar sareeya oo loogu talogalay ardayda oo dhan — waa maalgalin ay tahay in la sameeyo, haddii la rabo in la sugo aayaha Maraykanka.

**La-soo-xidhiidhista OCR**

Kooxda Adeegga Macmiilka ee joogta xarunta qaran ee OCR ayaa ka jawaabta khadka su'aalaha (hotline) ee OCR. Soo-wacayaashu waxay isticmaalaan khadka su'aalaha si ay u weydiiyaan su'aalo tiro badan oo ku saabsan arrimo la xidhiidha xeeraraka xuquuqda madaniga ah ee federalka iyo siyaasadaha iyo tilmaamaha OCR, iyo si ay war uga helaan barnaamijka fulinta ee OCR.

Haddii aad jeceshahay inaad heshid war dheeraad ah oo ku saabsan xeerarka uu Xafiiska Xuquuqda Madanigu fuliyo, sida loo xereeyo dacwad ku saabsan xuquuqda madaniga ah, ama sida loo helo gargaar farsamo, waxa aad la xidhiidhi kartaa xafiiska fulinta ee u adeegga gobolkaaga ama Dhul Maraykan (U.S. Territory). Xafiisyada fulinta waxa lagala xidhiidhi karaa: http://www.ed.gov/ocr/contactus.html.

Wixii ah war dheeraad ah:

**Khadka su'aalaha ee OCR (Hotline):** 1-800-421-3481; TDD: 877-521-2172

**Iimayl:** OCR@ed.gov

**Webka:** http://www.ed.gov/ocr